



## Codso Sanduuqa Fursadaha Webiga Duwamish ee Seattle

Xafiiska Joogteynta & Deegaanka Seattle (OSE) wuxuu ku faraxsan yahay inuu ku dhawaaqo [Sanduuqa Fursadaha Wabiga Duwamish](#) inuu **hadda aqbalayo codsiyada**. Sannadkan, \$240,000 ayaa loo heli karaa deeqo ilaa \$40,000 si loogu taageero mashaariicda dhici doona 2024ka. Lacagahan ayaa ah in lagu taageero mashaariicda iyo barnaamijyada ay bulshadu hogaamiso ee kor u qaadaya tayada nolosha ee Dooxada Duwamish. **Xilliga kama dambaysta ah ee codsigu waa 5pm (PT) Isniinta, Agoosto 7.**

Fursadan maalgelineed waxay u furan tahay Qabaa'ilka iyo ururada qabaa'ilka, ururada aan faa'iido doonka ahayn, kooxaha bulshada, iyo ganacsiyada si dhow ula shaqeeya bulshooyinka Dooxada Duwamish. Noocyada mashaariicda waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn fanka iyo wada-sheekeysiga, waxbarashada bulshada, dhisidda awoodda ururka iyo bulshada, u-diyaargarowga isbeddelka cimilada, dhisidda xirfadaha iyo tababarrada shaqada, iyo qorsheynta bulshada iyo aragtida.

Haddii aad xiisaynayso inaad wax badan ka ogaato Sanduuqan, ka doodista fikradda mashruuca, ama soo gudbinta qandaraas, waxaad qaadi kartaa tillaabooyinka soo socda:

- [Halkan](#) iska diiwaan geli 20-daqiiqo wac xubin ka mid ah kooxdayada
  - *Fadlan isticmaal foomka si aad u codsato fasiraad.*
- Ka qaybgal kulanka macluumaadka farsamada:
  - Juun 21, 3:30-4:30 galabnimo - [halkan iska diwaangeli](#)
  - *Fadlan iimayl noogu soo dir [DROF@seattle.gov](mailto:DROF@seattle.gov) si aad hore ugu codsato turjubaan.*
- Iimayl u dir [DROF@seattle.gov](mailto:DROF@seattle.gov)

Booqo [seattle.gov/environment/DROF](https://seattle.gov/environment/DROF) si aad wax badan uga barato oo aad u codsato.